# INDHAHA CIRKA

## Soo-jeedin Qaran oo Lagu Xoojinayo Amniga Habeenkii ee Muqdisho

**“Askari dhulka jooga wuxuu ilaalin karaa meesha uu taagan yahay. Technology-gu wuxuu ka caawin karaa inuu arko meel ka baxsan indhihiisa.”**

Muqdisho waxaa habeen kasta ilaaliya ciidamo Soomaaliyeed.

Askari ayaa checkpoint taagan. Mid kale wuxuu ilaaliyaa xarun dowladeed. Boolis ayaa waddooyinka gaaf-wareegaya. Sirdoon ayaa xog ururinaya. CCTV ayaa meelo badan duubaya.Dhammaantood waxay qabtaan shaqo muhiim ah. Laakiin marka qorraxdu dhacdo, waxaa jirta su'aal ay tahay in madaxda amniga qaranku maanta isweydiiyaan:

# Maxaa dhacaya meelaha aanu askarigu arki karin?

Argagixisadu ma doorato meesha dowladda ugu xooggan tahay. Waxay raadisaa meesha nidaamka amnigu ka liito.Haddii waddo la ilaaliyo, waxay raadinayaan waddo kale.Haddii checkpoint la adkeeyo, waxay raadinayaan meel kale oo laga gudbo.Haddii hab la ogaado, waxay isku dayayaan hab kale. Sidaas darteed dagaalka maanta laguma guuleysan karo askari badan oo keliya.

Waxaa loo baahan yahay:

**ASKARI + CCTV + DRONE + SIRDOON + XARUN TALIS + JAWAAB DEGDEG AH**

---

# HALKA AY DHIBAATADU KA JIRTO

Bal sawiro Muqdisho habeenkii. Askari checkpoint jooga ayaa baaraya gaadiidka hortiisa maraya.Wuxuu qaban karaa shaqadiisa si wanaagsan.

Laakiin dhowr daqiiqo ka hor inta gaarigaasi soo gaarin checkpoint-ka, askarigu ma arki karo halka uu ka yimid. Markuu ka gudbana, dhowr daqiiqo kadib ma arki karo halka uu aaday. Taasi ma aha khalad askariga ka yimid.**Waa xadka indhaha bani'aadamka.**Halkaas ayay technology-gu shaqada ka bilaabi kartaa.

---

# SOO-JEEDINTA: MOGADISHU NIGHT AERIAL SURVEILLANCE UNIT

Waxaan soo jeedinayaa in Dowladda Federaalka Soomaaliya ay qiimeyso dhismaha unug gaar ah oo taageera booliska iyo hay'adaha kale ee ammaanka:

## Mogadishu Night Aerial Surveillance Unit

Unugga Ilaalinta Hawada Habeenkii ee Muqdisho Ujeeddadu ma aha in drone-ku beddelo askariga. Ee taas waan ku celinayaa:

# Drone-ku askariga ma beddelayo — wuxuu askariga siinayaa indho dheeraad ah.

Drones leh night-vision iyo thermal-imaging capability waxay xarunta taliska siin karaan situational awareness marka ay jirto baahi amni oo deg deg ah. Ciidanka dhulka jooga wuxuu hayaa awoodda baaritaanka iyo jawaabta. Sidoo kale sirdoonku wuxuu hayaa xogta. CCTV-gu wwaxay hayaa sawirka goobaha uu daboolo. Drone-kuna wuxuu ka caawin karaa xarunta taliska inay aragto sawirka ballaaran.

---

# MAXAY TANI UGA DHIGAN TAHAY ASKARIGA CHECKPOINT-KA JOOGA?

Waxaa laga yaabaa in tani tahay faa'iidada ugu weyn.

Askari checkpoint jooga maanta wuxuu inta badan ku tiirsan yahay:

**indhihiisa, khibraddiisa, radio-ga iyo xogta loo soo gudbiyo.**

Haddii nidaamka cusub lagu daro, xarunta taliska ayaa siin karta digniin iyo xog dheeraad ah marka khatar la xaqiijiyo.Markaas askarigu ma aha nin keligiis waddo mugdi ah taagan.Waxaa gadaashiisa jooga nidaam.

Cirka waxaa jooga indho.Xarunta taliska waxaa jooga xog.Dhulka waxaa jooga ciidan.Haddii khatar dhacdana waxaa diyaar ah jawaab.

Taasi waa waxa loo yaqaan **integrated security system.**

---

## MARKA QARAX DHACO, ILBIRIQSIYADU WAXAY NOQDAAN QAALI

Marka qarax dhaco, daqiiqadaha ugu horreeya waxaa jira jahawareer.

Dad ayaa carararaya.Gaadiid ayaa istaagaya.Dhaawacyo ayaa jira.

Ciidamada ayaa isku dayaya inay fahmaan waxa dhacay.Xarunta taliskuna waxay u baahan tahay jawaab degdeg ah:

**Maxaa dhacay?**

Halkee ayay dhibaatadu ku kooban tahay?Waddooyinkee gurmadku mari karaa?Ma jiraan khataro kale oo muuqda? Aerial observation waxay siin kartaa taliska sawir guud iyadoo ciidamada dhulka ay badbaadinayaan shacabka oo sugayaan goobta. Halkaas drone-ku ma aha camera duulaya oo keliya ee wuxuu noqonayaa qalab go'aan-qaadasho go aamoya.

---

## KA GUUR “MAXAA DHACAY?” UNA GUUR “MAXAA SOO SOCDA?”

Qaabka amniga ee daciifka ahi wuxuu shaqeeyaa marka dhibaatadu dhacdo kadib. Qaabka casriga ahi wuxuu isku dayaa inuu khatarta ogaado kahor inta aysan dhibaato dhalin. Taasi waa isbeddelka aan proposal-kan doonayo:

**REACTION**

↓

**DETECTION**

↓

**VERIFICATION**

↓

**COORDINATION**

↓

**PREVENTION**

Haddii weerar la fashiliyo ka hor inta uusan dhicin, shacabka badankood weligood ma ogaan doonaan.Laakiin taas ayaa ah guusha ugu weyn ee hay'ad amni. Weerarka ugu wanaagsan ee la maareeyo waa kii aan waligiis dhicin.

---

# MUQDISHO WAXAY U BAAHAN TAHAY NIDAAM LAKABYO BADAN LEH

Ma jiro technology keliya oo magaalo badbaadin karta.

Sidaas darteed qorshahani ma aha “Drone Project.”

Ee waa **Integrated Urban Security Project.**

**ASKARI** Wuxuu joogaa dhulka.

**CCTV** wuxay xasuustaa waxa goobtiisa ka dhacay.

**DRONE .** Wuxuu siin karaa taliska aragti ballaaran.

**SIRDOON** Wuxuu xogta siinayaa askariga dhulka jooga.

**COMMAND CENTER** Wuxuu isku xirayaa sawirka iyo xogta iyo video .

**RAPID RESPONSE** Wuxuu xogta u beddelayaa ficil.

Marka lixdaas awoodood isku xirmaan, Muqdisho ma helayso qalab cusub oo keliya. **Waxay helaysaa nidaam cusub.**

---

# HAL DRONE OO FIICAN kuma FILNA — NIDAAM FIICAN AYAA MUHIIM AH

Waxaa muhiim ah inaan madaxda dowladda u sheegno xaqiiqda:

Iibsashada drones keliya xal ma aha.Waxaa loo baahan yahay:

tababar, command-and-control, maintenance, data management, sharci, accountability iyo isku-xirka hay'adaha.

Haddii aan drone iibsanno laakiin xogtiisu aysan gaarin askariga u baahan, wax badan ma aynaan beddelin.

Haddii CCTV, drone, boolis iyo sirdoon mid walba xogtiisa meel gaar ah ku haysto, waxaan haysannaa technology badan laakiin nidaam yar.

**Awooddu waxay ka dhalataa isku-xirka.**

---

# MAGAALADA WAA INAY YEELATAA XUSUUS DIJITAAL AH

Qodobkan waxaan u arkaa mid istaraatiiji ah. Marka dhacdo amni dhacdo, baaritaanka waa inuusan mar kasta eber ka bilaaban.

Xogta sharci ahaan la ururiyey waxaa lagu falanqeyn karaa si loo fahmo:

**Maxaa dhacay?**

**Maxaa ka horreeyay?**

**Halkee ayuu nidaamku ku fiicnaa?**

**Halkee ayuu ka liitay?**

**Ma jiraan patterns soo noqnoqda?**

Marka xogtaas la isku geeyo, camera-gu ma aha camera oo keliya.

Drone-kuna ma aha drone oo keliya.

**Xogtu waxay isu beddelaysaa sirdoon.**

---

# ABAALMARI ASKARIGA GUULEYSTA

Waxaan sidoo kale soo jeedinayaa in nidaamka cusub lagu daro hab lagu aqoonsado waxqabadka wanaagsan.

Haddii askari ama koox: khatar ogaato,weerar ka hortagto,

shacab badbaadiso,ama hawl muhiim ah si xirfad leh u fuliso,

waa in hay'addu aqoonsataa. Waxaa jiri kara dallacsiin, tababar sare, shahaado sharaf ama abaalmarin kale.

Sababtu waa fududahay:

# Waxqabadka aan la aqoonsan mararka qaar wuu dhintaa. Waxqabadka la aqoonsadana wuxuu noqdaa dhaqan.

Dhanka kale, dayacaad la caddeeyey waa in lala xisaabtamaa.

Laakiin isla xisaabtanku waa inuu ku dhisnaadaa baaritaan iyo caddeyn, ma aha eedeyn degdeg ah.

---

# SHACABKA LOOMA DHISAYO NIDAAM LAGU BASAASO

Tani waa inay noqotaa khad cas.

Ujeeddadu ma aha in qof kasta oo Muqdisho jooga la daba galo.

Ujeeddadu waa **ilaalinta shacabka iyo ka hortagga khataraha amniga iyadoo sharciga la dhowrayo.**

Waa in la qeexaa:  cidda xogta geli karta, sababta loo isticmaali karo,

muddada la kaydin karo,iyo cidda kormeereysa isticmaalkeeda.

Dowladdu waxay u baahan tahay awood amni.Shacabkuna wuxuu u baahan yahay kalsooni.

**Labaduba waa suurtagal.**

---

# MAXAA LOOGA BAAHAN YAHAY MADAXDA DOWLADDA?

Ma soo jeedinayo in berri magaalada oo dhan drones lagu buuxiyo.

Waxaan soo jeedinayaa wax ka macquulsan: *BILAABA PILOT PROGRAMME.* Dowladdu ha sameyso qiimeyn farsamo.Ha la doorto unug yar oo xirfad leh. Ha la sameeyo tababar iyo command structure.

Ha la dejiyo sharciyada xogta iyo accountability-ga.Kadibna muddo cayiman ha la cabbiro:

Ma kordhay situational awareness-ku?

Ma yaraaday waqtiga jawaabtu?

Ma wanaagsanaaday isku-xirka hay'aduhu?

Ma caawisay baaritaanka dhacdooyinka?

Ma kordhisay badbaadada ciidamada iyo shacabka?

Haddii jawaabtu noqoto haa, markaas nidaamka si tartiib ah ayaa loo ballaarin karaa.

Tani waxay dowladda ka ilaalinaysaa kharash aan la tijaabin, isla markaana waxay siinaysaa caddeyn ay go'aan weyn ku gaarto.

---

# FARriin KU SOCOTA MADAXDA QARANKA

Mudane Madaxweyne,

Mudane Ra'iisul Wasaare,

Wasiirka Amniga,

Taliyayaasha ciidamada,

iyo madaxda hay'adaha amniga:

Ciidamada Soomaaliyeed waxay habeen kasta naftooda u dhigaan ilaalinta Muqdisho. Waxay mudan yihiin wax ka badan ammaan afka ah.

**Waxay mudan yihiin technology ka dhigaysa shaqadooda mid ammaan badan oo wax-ku-ool badan.**

Askari habeen mugdi ah checkpoint taagan yaan laga rabin inuu indhihiisa oo keliya ku ilaaliyo magaalo malaayiin qof ku nool yihiin.

Sii xog.Sii technology.sii xarun talis oo taageerta.

Sii awood uu khatarta ku ogaado ka hor inta aysan isaga soo gaarin.

---

# GUNAANAD

Argagixisadu waxay raadisaa meelaha aynaan arkin.

Jawaabteennu waa inay noqotaa:

### Inaan yareyno meelaha aynaan arki karin.

Muqdisho uma baahna checkpoints badan oo keliya.

Waxay u baahan tahay nidaam awood u leh inuu:

**ARKO → FAHMO → ISKU XIRO → DIGNIIN BIXIYO → JAWAABO**

Askarta dhulka joogta waa **laf-dhabarta** amniga.

CCTV-gu waa **xusuusta**.

Sirdoonku waa **maskaxda**.

Rapid Response-ku waa **gacanta**.

Drone-kuna wuxuu noqon karaa:

# INDHAHA CIRKA.

Maanta su'aashu waxay tahay:

**“Yaa checkpoint-ka soo maray?”**

Berri waa inaan awoodnaa inaan weydiinno:

# "Maxaan ogayn ka hor inta uusan soo gaarin?"

Waxaa laga yaabaa in farqiga u dhexeeya labadaas su'aal uu noqdo farqiga u dhexeeya **qarax dhacay iyo qarax laga hortagay.**

**Aan ciidankeena siinno indhaha ay u baahan yihiin.**

**Aan Muqdisho ka dhigno magaalo aan habeenkii indho la'aan noqon.**



1. HORDHAC
INDHAHA CIRKA:
UNUGGA ILAALINTA HAWADA HABEENKII EE MUQDISHO
Askari dhulka jooga wuxuu ilaalin karaa meesha uu taagan yahay.
Technology-gu wuxuu ka caawin karaa inuu arko meel ka baxsan indhihiisa.
2. DHIBAATADA LA AQOONSADAY
MAXAA DHACAYA MEELAHA AANU ASKARIGU ARKI KARIN?
Askari checkpoint jooga wuxuu arkaa waxa hortiisa.
CCTV wuxuu arkaa meesha uu ku jeeddo.
Laakiin gaari ama mooto habeenkii dhaqaaaysa ma arko meesha uu ka yimid iyo halka uu aadayo.
Taasi ma aha khalad askariga. Waa xadka indhaha bania'aadmka.
STOP
3. SOO-JEEDINTA
MOGADISHU NIGHT AERIAL SURVEILLANCE UNIT
Unug gaar ah oo drones-ka habeenkii u isticmaala ilaalinta muhiimada amniga.
Drones leh night-vision & thermal imaging.
Xogta waxaa lagu xiraa xarun talis oo ay wada isticmaalaan Booliska, Sirdoonka & Kooxaha Gurmadka.
Ujeedadu ma aha in qof kasta la daba galo, ee waa in khatar dhab ah oo la ogaado.
4. CHECKPOINT-KU WAA MUHIIM
LAAKIIN KELIGIIS KUMA FILNA
Askari wado jooga ma arki karo waxa ka dambeeya dhisme, waddo kale ama meel ka baxsan aragtidiisa.
Drone-ku wuxuu siin karaa taliska aragti ballaaran oo xaaladda ah.
Way is dhammaystiraan, midna midka kale ma beddelayo.
5. JAWAABTA DAQIIQADAHA UGU HORREEYA
MARKA QARAX DHACO, ILBIRIQSIYADU WAXAY NOQDAAN QAALI
Drone si degdeg ah loo hawlgeliyo wuxuu siin karaa sawir guud oo goobta ah.
Wuxuu caawiyaa in la helo:
✓ Waddooyinka xiran
✓ Dad dhaawacmay
✓ Meelaha dabka ka kacay
✓ Khataraha kale ee muuqda
Xogta waxaa lagu dari karaa CCTV, warbixinnada ciidamada iyo xogta kale.
Halkii tobanaan kooxood ay xog kala duwan hayn lahaayeen, xarun dhexe ayaa isku xirta sawirka.
6. NIDAAM LAKABYO BADAN LEH
ASKARI DHULKA JOOGA
CCTV
XARUN TALIS & COMMAND CENTER
DRONE SURVEILLANCE
SIRDOON
RAPID RESPONSE
MID WALBA WUXUU DABOOLAYAA MEEL UU KAN KALE KU LIITO.
7. MAGAALADA OO LOO QAYBIYO AAGAG MAS'UULIYADEED
Magaalada iyo marinada muhiimka ah waxaa loo qaybin karaa sectors.
Koox kasta waxay leedahay saraakiil mas'uul ah.
Faahfaahinta sectors-ka, goobaha drones-ka, jadwalka & coverage waa xog amni oo qarsoodi ah.
Haddii la daabaco, nidaamka difaaca ayaa laga yaabaa inuu isku beddelo buug tilmaamaya meelaha laga dhuuman karo.
SECTOR 3
SECTOR 2
SECTOR 2
SECTOR 3
SECTOR 6
SECTOR 8
SECTOR 9
SECTOR S
8. ABAALMARIN IYO ISLA XISAABTAN
ABAALMARIN
• Askari ama koox khatar ogaata, weerar ka hortagta ama shacab badbaadisa waa in la abaalmariyaa.
✓ Dallacsiin
✓ Tababar sare
✓ Abaalmarin rasmi ah
✓ Shahaado sharaf
ISLA XISAABTAN
Haddii baaritaan madax-bannaan caddeeyo dayacaad ama ku tumasho nidaamka amniga, waa inuu jiraa isla xisaabtan.
Laakiin waa in lagu dhisnaadaa caddeyn iyo baaritaan.
9. DRONES-KU MA AHA XAL MUCJISO AH
Drone keliya isma joojin karo Al-Shabaab.
Wuxuu yahay hal qayb oo ka mid ah nidaam weyn.
Weli waxaa loo baahan yahay:
✓ Human intelligence
✓ Baaritaanka gaadiidka & explosives
✓ CCTV & technology kale
✓ Tababar ciidanka
✓ Xog-wadaag & kalsoonida shacabka
Muqdisho amnigeeda laguma dhisi karo iyadoo qof kasta loo arko tuhmanaha xiga.
10. MAGAALADA WAA INAY YEELATAA XUSUUS DIJIITAAL AH
Xogta la ururiyo waa in si sharci ah loo keydiyaa.
Baarayaashu waxay dib u eegi karaan si ay u fahmaan waxa dhacay.
Waxaa la raadin karaa patterns & meelaha nidaamku ku liitay.
Technology-gu wuxuu noqdaa sirdoon dhab ah.
URURIN XOG
KEYDIN AMNI
FALANQAYN
PATTERNS
SIRDOON
11. NATIIJADA LA FILAYO
HADAFKAAN SI SAX AH LOO ISTICMAALO
Ogaansho hore oo khataraha ah
Waqti jawaab oo gaaban
Isku-xirnaan hay'adaha
Baritaan & caddeyn oo fiican
Badbaadinta shacabka & ciidamada
Yaraynta qaraxyada & weerarrada
"Weerarka ugu wanaagsan ee la maareeyo waa kii aan waligiis dhicin."
12. GUNAANAD IYO TALADA SARKAALKA
Muqdisho waxay u baahan tahay nidaam awood u leh inuu arko, fahmo, isku xiro xogta, digniin bixiyo, kadibna si degdeg ah uga jawaabo.
Askarta dhulka joogta waa laf-dhabarta.
CCTV-gu waa xusuusta.
Sirdoonku waa maskaxda.
Kooxaha gurmadku waa gacanta.
Drone-kuna waa indhihiisa cirka.
Aan bilaabno PILOT PROGRAMME, ka hor inta aan loo gudbin hirgelin ballaaran.